



Macluumaadka cusub ee ciyaaraha: Gabdhaha Benson, wiilasha Grant oo ku guuleystay ciyaaraha heerka sare ee kubadda kolayga

Gabdhaha Benson iyo wiilasha Grant waxay guuleysteen ciyaaro lagu kala baxayay Sabtidii oo ah ciyaaraha aadka loo hadal hayay ee Naadiga Dugsiyada Ka Dhexeeya ee Portland ee dhacadiisa ka dhacday Dugsiga Sare ee Marshall. Gabdhaha Benson ayaa Grant kaga adkaaday 87-55, iyada oo wiilasha Grant ay Jefferson kaga guuleysteen 83-82 taasi oo ah qaybta u dambeysa ee ciyaaraha kooxahani iskaga hor imaanayaan.

Koox kasta oo ka tirsan PIL ayaa ku ciyaaray mid ka mid ah laba goobood Sabtidii, lix ciyaarood oo ka dhacay Marshall, iyo afar ciyaarood oo ka dhacay Dugsiga Sare ee Wilson.

Ardayda ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta oo hoggaanka u hayay Techsters:

Gabdhaha Benson ayaa helay 33 dhibcood oo ay u dhalisay ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigata ee Cierra Ellington iyo 23 dhibcood oo ay dhalisay ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigata ee Tayler Lyday, iyada oo Techsters ay isticmaaleen cadaadiska dhanka difaacada si ay ugu qabsaan 20 jeer oo ay kubadda la wareegeen si ay u guuleystaan iyaga oo ku sugan garoonka ciyaarta ee General.

Benson, oo ah kooxda kaalinta labaad ka gashay ee Class 6A ee gobolka ee soo laabanaysa, ayaa waqti hore hoggaanka u qabatay iyada oo dhalisay 27 dhibcood qeybtii hore ee ciyaarta isla markaana si kalsooni leh u hoggaaminaysay intii ay ciyaartu socotay. Labadii xilli-ciyaareed ee la soo dhaafay, Techsters iyo Generals ayaa kala qaybsaday labadoodii ciyaarood iyada oo wadaagay horyaalnimada PIL.

Ardayada ciyaartoyga ah ee sanadkii u dambeeyay dhigata Grant ee Monka Hickok, oo ahayd Ciyaaryahanada Sanadka ee xilli-ciyaareed ee la soo dhaafay ee PIL, ayaa dhibaato kala kulantay qalad ay sameysay waxayna dhibcaheedii ku soo koobteen 12 dhibcood.

Guushu waxay sii waday in ay bilaw wanaagsan u noqoto Benson (7-4), oo kaliya hal mar guuldareystay ay 55-50, oo ay kaga raysay koox ka soo horjeeday oo gobolka ka tirsan, oo difaacanaysa horyaalka 6A ee Southridge taasi oo ah ciyaar labaad oo daba socota ciyaartii sanadkii la soo dhaaftay dhacday ee horyaalka gobolka. Techsters waxay garaaceen Tigard markii ay Lambarka 1 kaga jireen gobolka iyo sidoo kale Garfield of Seattle, oo Lambarka 2 kaga jirtay Class 3A ee Washington taasi oo cod la qaatay lagu soo xushay.

Benson iyo Grant waxay mar labaad ciyaari doonaan Arbacada, Febraayo 6, ciyaarta oo 7:15 habeenimo ka dhacaysa goobta jimicsiga ee Benson.

Generals oo ku guuleystay ciyaar la isku dhibco dhawaa: Ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta ee Aaron Deloney ayaa dhaliyay tuuritaanka xorta ah 'free throw' iyada oo ay ciyaarta ka harsanayd 9.6 ilbiriqsi si uu wiilasha Grant u siiyo guushoodii labaad ee isku xigta oo ay kaga guuleysteen Jefferson. Taasi oo sidan oo kale dhacday ka dhacday ciyaartii horyaalka Class 6A ee sanadkii la soo dhaafay, markii ay ay Generals ku guuleysteen 63-62. Intaasi ka hor, Jefferson waxay sideed jeer oo isku xigta ka guuleysatay Grant.

Ciyaartii Sabtidii waxay noqotay ciyaar la isku dhibco dhawaaa oo u dhaxaysay labada kooxood. Afartii ciyaarood ee sanadkii la soo dhaafay dhammaantood waxaa lagu kala baxay shan dhibcood iyo wax ka yar.

Deloney wuxuu keenay 30 dhibcood iyo sideed taageero, iyada oo ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta ee Ty Rankin uu ku daray 17 dhibcood oo uu u dhaliyay Grant Ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta ee Marcus Tsohonis, oo ah Ciyaaryahanka PIL iyo Ciyaaryahanka Sanadka ee Class 6A, ayaa hoggaanka u hayay Jefferson isaga oo keenay 25 dhibcood.

Grant iyo Jefferson waxay mar labaad ciyaari doonaan Khamiista, Janaayo 31, ciyaarta oo 7:15 habeenimo ka dhacaysa Dugsiga Sare ee Jefferson.